



Buugga Siyaasadda iyo Nidaamka Booliska ee Waaxda Booliska Minneapolis

Number:
7-1000

Mujalladda 7aad – Hawlgallada goobta

Dadka Naafada ah oo Aqoonta Luqaddooda Ingiriisiga ay Xaddidantahay

7-1003 **Gaadiidka ku qaada Dadka Curyaanka ah/Naafada ah Kursiga Curyaanka** (06/19/94) (11/06/07) (05/06/15)

Tixgalin gaar ah ayaa loo baahan yahay marka la qaadayo qofka naafada ah ee ku jira kursiga curyaanka. Marka dadka naafada ah ee kuraasta curyaamiinta ah la xiro, lana geeyo si looga dhaqo sunta jirkiisa ku jirta (Detox), ama u baahan in lagu meeleyo daryeelka caafimaadka iyo rugta daryeelka ee HCMC, dadkaas waxaa lagu qaadi doonaa baabuur boolis mar kasta oo ay suurtagal tahay. Si kastaba ha ahaatee, saraakiishu qaaditaanka ka hor waa inay qofka naafada ah weydiyaan haddii ay jirto sabab caafimaad oo aan looga saari karin kursiga curyaanka si gaariga booliska (squad car) loogu qaado.

Haddii qofku uu sheego in aan laga saari karin kursiga curyaanka, markaa gaadiid gaar ah sida gaariga faanka (van) oo leh wiish qaadi kara waa in la helaa. Gaadhi leh wiishka ku shaqeeya korontada/haydarooliga ah ayaa laga heli karaa Xafiiska Xakamaynta Gaadiidka, maalmaha shaqada ka hor saacadaha 1530 galabnimo. Saraakiishu waa inay la xiriiraa Kormeeraha Kontroolka Wadooyinka (612)335-5932, kaasoo qaadi doona kursiga curyaanka ee qofka la xiray. Sarkaalka codsanaya gaariga loogu talogalay qaadista curyaanka ee leh wiish-ka ee Koontoroolida gaadiidka waa in uu siiyaa Kormeeraha Kontroolka Taraafikada magacyadooda, lambarka aqoonsiga shaqaale, lambarka gaarigga ay wataan, iyo ciwaanka halka qofka la xiray iyo kursigaba loo qaadayo. Hal sarkaal ayaa looga baahan yahay inuu raaco qofka saaran faanka wiishka leh haddii qofka la xirayo. Saraakiisha loogama baahna inay weheliyaan/raacaan qaadista kursiga curyaanka. (11/06/07) (12/14/07)

Saacadaha 1530 galabtii ka dib iyo maalmaha fasaxa ah saraakiisha ayaa laga yaabaa inay ka helaan isticmaalka baaburka wiishashka leh ee saldhigga xaafada 1aad. Furaha baaburka oo ay la socdaan tilmaamo gaar ah oo lagu heli karo faanka (van-ka) iyo ka shaqaynta wiishka qaadaya ayaa laga heli karaa goobta saldhigga 1aad. Su'aalaha waa in lagu hagaajiyo shaqaalah saldhigga 1aad, kuwaas oo loo tababaray habka qaadista kuraasta curyaamiinta. Shaqaalah xaa fadda 1-aad waxay siin doonaan caawimo saraakiisha ku saabsan adeegsiga qalabka, laakiin mas'uul kama aha in dadka la xiray u qaadaan saldhigyo/xaafado kale. (11/06/07) (12/14/07)

Haddii uu qofku sheegto in laga saari karo kursiga curyaanka, saraakiishu waxay qofka naafada ah ka caawin doonaan gaarigga lagu qaadayo (squad-ka), iyagoo isticmaalaya xanaanayn iyo taxadar. (08/27/95) (11/06/07)

Marka saraakiishu ay dhawaan xiriir la sameeyeen qofka naafada ah si loo qaado oo ay ogaadaan in aysan jirin sabab caafimaad oo qofka aan laga saari karin kursiga curyaanka, qofka waxaa lagu qaadi karaa gaarigga booliska ee squad-ka.

Dhammaan kuraasta curyaamiinta waa in la geeyaa goobta lagu loo qaado qofka naafada ah, iyadoo kuraasta curyaanka ah ee isku-laabmaya lagu qaadayo jirrida baabuurka booliska squad-ka ah. Marka qof wata kursiga curyaanka ee is-wada lagu qaado gaari booliska ee squad-ka ah, waa in loo yeeraa oo loo tilmaamaa si loogu qaado kursiga curyaanka goobta uu ku sugaran yahay qofka naafada ah.

Saraakiisha waxay la xiriiri karaan MECC si ay ugu diyaariyaan imaatinka qofka naafada ah goobta saxda ah ee sun ka saarida ama xabsiga lagu xiray, ama waxay ula xiriiri karaan xarunta si iskood ah. (03/18/96) (11/06/07)

Qaadista Maxbuuska - Marka qaaditaan loo baahan yahay in la geeyo goobta lagu xirayo, saraakiishu waa inay la xiriiraan ama ka codsadaan MECC inay la xiriiraan Kormeeraha Qabashada maxaabiiista Jeelka si loogu diyaariyo xirista maxbuuska sida ugu dhakhsaha badan. Kormeeraha Qabashada Jeelka waxa lagala xiriiri karaa (612)596-8010. (03/18/96) (11/06/07)

U Qaadista goobta sun ka dhiqista (Detox-ta) - Marka qaadis loo baahan yahay ee lageynayo xarunta/goobta sun-kasaarista, saraakiishu waa inay codsadaan in MECC ay la xiriiraan kormeeraha 1010 Currie si loo ogolaado qofka. 1010 Currie ayaa ah goobta la door biday sababtoo ah kuraasta curyaanka oo badan oo la heli karo awgeed. Haddii 1010 Currie aanu aqbalii karin qofka, kormeeraha shaqaalahooda waa inuu awood u leeyahay inuu u hago qaadistaas xarunta hoyga kale ee ku habboon. Sida habboon, qabanqaaboyinkaan waa in la sameeyaa kahor imaatinka adeegga faanka qaadaya curyaanka. Darawalka gaariga faanka waxaa markaa lagu hagi karaa xarunta horay loo sii diyaariyay. Nambarka taleefanka 1010 Currie waa 379-3646. (03/18/96) (11/06/07)

Saraakiishu waa in ay raacaan habraacyada baaritaanka iyo xakameynta waaxda marka ay la macaamilayaan dadka naafada ah ee ku jira kuraasta curyaamiinta. Daryeelka dheeraadka ah waa in la sameeyaa inta lagu jiro habraacyadan sababtoo ah qofka la xiray (maxbuuska) xaaladiisa jireed iyo/ama caafimaad.